

# Waa maxay imtixaamida luqaddu?

**Imtixaamida luqaddu waxay ka caawisaa macalimiinta inay fahmaan haddii ardaydu ay qaadatay xirfadaha luqadda ay u baahnaayeen si ay si buuxda uga qayb galaan gudaha fasalka.**

Ardaydu waxay isticmaalaan dhegaysiga, hadalka, akhriska, iyo xirfadaha qoraalka si ay u bartaan macluumaadka akaadeemiga, u wadaagaan macluumaad, oo u falan qeeyaan fikradaha. Kuwan waa xirfadaha ay dhammaan ardaydu ku shaqeeyaan dhammaan waxbarashooda. Imtixaamida luqaddu waxay qiyaastaa xirfadaha ardayga ah ee dhammaan afartan dhinac.

Ardayda loo aqoonsaday sida ELLs waxay galaan imtixaanka luqadda Ingiriisiga sanad kasta.

- Dugsiyada, degmooyinka dugsiya, iyo goboladu waxay isticmaalaan buundooyinka imtixaanka markay go'aan ka gaadhaan waxa taageerada luqadda Ingiriisiga ee la bixinayo,
- Macalimiintu waxay isticmaalaan buundooyinka imtixaanka markay go'aan ka gaadhaan waxa iyo sida wax loo barayo ardaydooda.
- Waxaad u isticmaali kartaa buundooyinka imtixaanka inaad ku raad raacdo horumarka ilmahaaga barashada ingiriisiga akaadeemiga ah iyo u doodista ilmahaaga xaga dugsiya.

Kala hadal macalimiinta ilmahaaga waxa ku saabsan marka aad heli doonto buundooyinka imtixaanka iyo sida taageeradu isku beddesho marka ilmahaagu dhisayo xirfadaha luqadda Ingiriisiga. Waydii ilmahaaga dugsigiisa sida uu go'aan uga gaadho marka ELLs joogsanayso helida taageerada luqaddu. Kala hadal macalinka ilmahaaga Sida aad ku taageerayso ilmahaaga barashadiisa luqadda xaga guriga.



## ELL

Ardayga luqadda Ingiriisiga, ama ELL, waa arday haysta fursada si uu u helo tilmaamaha Ingiriisiga ah, marka lagu daro qaadashada fasalada. ELLs waxaa laga qaadaa imtixaan sanad kasta si loo caawiyo macalimiintu inay fahmaan xirfadahooda luqadda, laakiin waxaad leedahay xaq inaad aqbasho ama diido taageerada luqadda.